Waxaa foolkeyga laga dheehan karaa inaan ahay qof ku barbaartay magalada Helsinki. Gaar ahaan waxaan ku dhashay Bariga Helsinki ee xaafada Kurkimäki meeshaas oo waqtigii caruurnimadeyda aan ku qaatay qeybna aan ku qaatay xaafada Vallilla. Xaafadahaas waxaan ka bilaabay waxbarashadeyda hoose, waxaan ilmaha deriska ku ciyaari jirnay keynta xaafada biyaha godadka fadhiya iyo geedaha qoloftooda oo aan ka dhisi jirnay aqalo yar yar.

Waxaan ahay xildhibaanad 37 jir ah, Hooyo u ah ubad yar kana tirsan golaha degmada Helsinki. Siyaasada iyo arrimaha bulshada waxaan kusoo galay wado ii gaar ah. Caawinaada dadka, in la saxo waxyaabaha toosinta u baahan iyo in mustaqbal wanaagsan la hiigsado ayaa kamid ah sababaha aan siyaasada golaha deegaanka ugu soo biiray.

Waxaan bartay in howsha aduunka ay tahay mid caqabado leh anagana nalaga rabo inaan aduunka hagaajino oo siduu hadda yahay si ka fiican ka dhigno. Helsinki qudheeda waxey u baahan tahay in la hagaajiyo oo sida ay hadda tahay si ka fiican laga dhigo, iyadoo laga shaqeynayo oo la horumarinayo sinnaanta iyo cadaalada. Waxaan golaha degmada Helsinki ka shaqeynaayay mudo 8 sano ah waxaan kale oo ahaa gudoomiyaha gudiga xisbiga SDP ee golaha Helsinki.

Sanadadii aan kujiray degmada waxey iga dhigeen qof ku faanta degmada ay ku dhalatay iyo dadka ku nool, laakiin mudooyinkii udanbeeyay waxaan dareemay inay magaaleedna Helsinki ay usii baahan tahay iskaashi dheeri ah, waxaan kale oo ubaahanahay is daryeel, farxad iyo wadashaqeyn.

Markaan dhalay ilmaheyga uhoreeyay waxaan aad uga sii fikiraayey sidii magaalada Helsinki Mustaqbal wanaagsan uyeelan lahayd. Waxaan dareensanahay in hadda ay tahay xilligii aan aqoonteyda iyo xoogeyga u hibeyn lahaa Helsinki. Waana sababta aan u go'aansaday inaan isku taago musharaxnimada duqa degmada ee Helsinki. Waxaan rabaa inaan kamid noqdo dhismaha Helsinki:da ah mid si fican ushaqeysa, hal abuur leh oo ay dadkeeda ku qanacsan yihiin.

Waxaan rabaa inaan ahaado musharaxada duqa degmada oo mataleysa bulshada oo dhan oo ka dalbaneysa wadashaqeyn.

Magaalada Helsinki waa magaalo koreysa oo kobceysa, kobocaas wuxuu ka socdaa xanaanada, dugsiyada waxbarasho ee kale duwan, dhismayaasha socda, wadooyinka gaadiidka iyo goobaha caafimaadka.

Koriinka wuxuu fursad siinaayaa waxyaalo badan sida dhismaha madxafka ama garoonka kubadda cagta, laakiin wuxuu kale oo leeyahay caqabado u gaar ah sida in la xaqiijiyo in

xaafadaha ay helaan dhul lama deegaan ku filan oo dadka iyo ilmaha ay ku nastaan ama jirdhis ku sameeyaan iyo in laga hortago kor u kaca qiimaha kirada guryaha. Sidoo kale waxaa loo baahan yahay in ilmaha laga caafiyo waxbarashada kuwa ubaahan caawinaada dheeriga ah iyo in dadka waayeelka ee kujira meelaha lagu xanaaneeyo waayeelka inay helaan Daryeel fiican.

Helsinki waxaa kasocda isbedelo badan, waana arin dabeecad u ah magaalooyinka waaweyn. Waxey leedahay xaafado ay dadkeeda aad iskugu xiran yihiin oo ay sameeyaan maalmo u asetetaan nadaafada iyo iibinta dharka lasoo isticmaalay oo ay dadka isugu soo baxaan.

Helsinki waa in la horumariyaa si siman iyadoo la tixgalinaayo xaafad walba iyo iyadoo ka qeybgal iyo wax isweydaarsi la siinaayo dadkoo dhan. Waxaa muhiim ii ah inaan ka warhayno in xaafadaha taariikhda leh horumarkooda iyo soo jiidashadooda xaqiijiyo iyadoo xaafada cusub ee soo koraayana la horumarinaayo. Koriinka magaalada waa inay barbar socotaa in keymaha iyo dhirta la ilaaliyo, si ay Helsinki wali usii ahaato magaala madaxda ugu cagaaran Yurub.

Helsinki waa inay ahaataa magaalada hormuudka u aha dhaqaalaha Finland iyo magaalada loogu jecel yahay in lagu noolaado. Aniga waxaan qabaa in dadka ay siman yihiin iyo in dadka danyarta ah la caafiyo oo la daryeelo. Qofwalba waxaa waajib ku ah inuu dadka la nool caawiyo isna waxqabsado, haduusan wax qabsan karinna caawinaad helo.

Mabaadiidaan waa kuwii lagu aas aasay dowlad finlandeys ah oo daryeesha dadkeeda, jiilkeena iyo kuwii ka horeeyay ayaa kasoo shaqeeyay. Waa inaan xajisanaa dhaxalkooda.

Waxaan bartay inaan qof kaligiis wax gaari karin. Isbedelada waaweyn iyo kuwa yar yar ee maalinlaha ah waxey ubaahan yihiin iskaashi.

Sidaas darteed musharax kasta wuxuu ubaahan yahay taageerayaal. Waanna waxaan urabo inaad adiga kaa codsado inaad nagu soo biirto oo nagala shaqeyso sidii aan Helsinki na wada matasha udhisano. Nala wadaag fikradahaaga iyo talooyinkaaga aanu ku wada horumarin karno Helsinki.

Barnaamij siyaasadeedkeyga waa mid wadashaqeyn ku dhisan

Meel la isku jeclaado, mee lagu dhaso, meel loo soo guur, meel lagu damaashaado, meel laga shaqeysto, meel lagu koro iyo meel lagu gaboobo.

Waxaasoo dhan waa qeybo ka kooban nolosha magaalada Helsinki, nolol amni oo degan iyo nolol isbedel iyo xiiso leh.

Waxaan rabaa inaan xilka duqa magaalada ugu shaqeeyo si wadashaqeyn ku dheehan tahay. Duqa magaalada kaligiisa ma laha go'aamada mustaqbalka magaalada, waa go'aamo ay ka wadashaqeeyaan dhamaan xisbiyada kamid ah golaha deegaanka.

Halkaan waxaan rabaa inaan kusoo gudbiyo barnaamijkeyga siyaasadeed ee xilka duqa degmada.

In la dayeelo da'yarta ilaa waayeelka

Helsinki qurxoon oo wanaagsan waxaan ku heli karnaa in qofwalba daryeel uu helo gaar ahaan caruurta iyo waayeelka. Waa inaan xaqiijinaa in qoysaska caruurta leh inay helaan dayeel iyo caawinaad ku filan. Midaasoo ka bilaabaneysa xarunta lagu daryeelo hooyooyinka uurka leh iyo dhalaanka iyo xanaanada caruurta lagu barbaariyo. Ilmawalba wuxuu xaq uleeyahay inuu helo iskuul xaafadiisa ku dhaw, iskuuladana waa in la xaqiijiyaa amnigooda iyo tayada waxbarashadooda. Waa in ardayda fasalka ay noqdaan kuwa yar oo macalinka ardayda si fican ardaydoo dhan wax ufahamsiin karo.

Waa in wax laga qabtaa sugitaanka dheer ee bukaanada ugalaan dhaqtarka iyo daryeelka caafimaad, waa in 2 asbuuc gudahooda uu bukaanka ku helaa dhaqtar iyo adeeg caafimaad. Waa in meesha laga saaraa farqiga udhaxeeya helitaanka dhaqtarka ee xaafadaha kale duwan ee Helsinki ka jira. Waa in hirgaliyaa barnaamijka caafimaadka ee qofwalba dhaqtar u gaar ah leeyahay. Waayeelka waa inay helaan daryeel ilaalinaaya baahiyahooda, waa in guryaha waayeelka iyo adeegyada la siiyo waayeelka kaligooda dagan loo qoondeeyo kalkaalisooyin ku filan. Waayeelka kaligooda degan waa in guryahooda lagu caawiyaa waana in lacag la'aan looga dhigo xarunta dabaasha.

Isbedelka cimilada in si farsameysan looga hortago

Isbedelka cimilada waa caqabada ugu waaweyn ee hada taagan magaalada Helsinki waxaa yoolkeedu yahay inay sanadka 2030:ka ay noqoto magaalo ka caagan tamarta aan dabiiciga ahayn sida saliidda iyo dhuxusha. Waa in la dhimaa wasaqda gaadiidka waana in la kordhiyaa gaadiidka ku shaqeeya korontada. Sidoo kale waa in la dhimaa wasaqda ka dhalata dhismaha oo dhismaha uu noqdo mid la jaanqaada siyaasada isbedelka cimilada ee magaalada.

Helsinki waxey kamid tahay magaalooyinka ugu cagaaran Yurub, mustaqbalkana waa inay sidaas ahaataa.

Dhaqaale kobac leh

Dhaqaalaha magaalada wuxuu ku dhismayaa in miisaaniyada iyo maareynta dhaqaalaha si masuuliyad leh loo fuliyo. Horumarinta caasimada waxey ubaahan tahay barnaamijyo

maalgashi, kuwaasoo qeyb ka ah kobaca magaalada.

Kobaca magaalada wuxuu meelmari kara marka ay magaalada tahay meel is-aaminaan iyo soo jiidasho leh. Taasna waxaa lagu abuuri karaa inay wadashaqeyn yeeshaan madaxda degmada iyo shirkadaha. Waxaan dhisi doona naadiga ganacsatada, kaasoo noqon doona meel aan xog isweydaarsi ku sameyno ganacsatada.

Helsinki inay noqoto magaalo soo jiidasho leh

Farasmagaalaha waa in la hormariyaa iyadoo hayada kale duwan wadashaqeyn lala sameynayo. Waa in la dhageystaa ganacsadayaasha kuwaasoo lagu tartan siinaayo bandhigyo dhaqameedyada ay qabanayaan. Waa in magaalada bandhigyo dhaqameedyo oo sanadlayaal ah ay yeelato, kuwaasoo lagu soo bandhigayo isdhexgalka iyo dhaqamada kale ee magaalada ku nool.

Helsinki waxey hiigsaneysaa inay utartanto magaalada martigelin doonto Olombikada ciyaaraha qaboobaha ee dhici doona sanadka 2034:ka.

Magaalo amni ah oo diyaargarowgeedu heersareeyo

Aduunka, Yurub iyo Helsinki waxaa ka socda isbedel amni oo dhinacyo badan ka imaanaayaa. Waa in aan ka digtoonaanaa oo xil iska saarnaa amniga caasimada iyo dadka ku nool. Helsinki waxey martigelineysaa shirka amaanka ee caasimadaha wadamada waqooyiga Yurub, shirkaas oo xog iyo warbixino la xiriira amniga la isku weydaarsan doono.

Shaqada booliska ee ka hortaga denbiyada waa in la taageero oo la xoojiyo. Degmada iyo booliska waa inay yeeshaan qof iskuxire u noqdo. Ma aqbaleyno inay sameysmaan kooxo amni oo bulshada ku dhex nool. Waa in amaanka magaalada uu xaafad walba gaarsiisan yahay. Waa in la hagaajiyaa xaafadaha magaalada ka kooban tahay iyo xarumaha gaadiidka metroga iyo trainka dayactir lagu sameeyaa.

In dimuqraadiyada la xoojiyo

Waa in xaafadaha magaalada iyo dadka ku nool codkooda la maqlaa oo ay fikir ku yeeshaan go'aamada degmada laga gaaro. Helsinki waa inay dalbato magaalada dimuqraadiyada ee Yurub ee 2027:ka, waana inaan tusaale unoqono magaalad dimuqraadiyada tixgelisa.

Helsinki waa magaalo ay dadka kunool siman yihiin oo aan boos uga banaaneyn cunsuriyad iyo faquuq, inaan qofna lagu takoori karin afkiisa, dhalashadiisa iyo midabkiisa. Magaalada waxey dhiiragelineysa cadaalada suuqa shaqada iyadoo dadka shaqo doonka ay shaqo raadsan karaan iyagoo lagu takoorin asalkooda.